



KUSOCOTA: QOYSASKA & BULSHADA PPS

KUS: NIDAAMYADA AMNIGA CUSUB EE DUGSIYADA PPS

Bulshada PPS ee Qaaliga ahoow,

Badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaheena waa mudnaan. Qoysasku waa shuraako muhiim u ah taageerida dugsiyadeena. Waxaan kaaga mahadcelineynaa taageeradaada waxaan kugu soo dhoweyneynaa dugsiyadeena. Si loo hubiyo indugsiyadeena ay u yihiin meel aamin ah ardayda iyo shaqaalaheena, waxaan qaadeynaa talaabooyin dheeri ah oo aan ku xaqiijineyno inaan ogaanno qofka kujira dhismayaasheena marwalba.

Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland waxay bilaabi doonaan hirgalinta nidaamka booqdaha/tabaruce ee cusub sanad dugsiyeedka 2019/20. Markii ay soo galaan dugsiya PPS, booqdayaasha/mutadawiciinta waxay u baahan doonaan inay soo bandhigaan aqoonsi ay dowladdu siisay (tusaale, laysanka darawalka, Kaarka Aqoonsiga Gobolka). Haddii aadan aqoonsi haysan, waxaa lagu weydiisan doonaa inaad bixiso magacaaga iyo taariikhda dhalashadaada. Nidaamkan cusub wuxuu u oggolaanayaa PPS inay baarto booqdayaasha iyo mutadawiciinta ka soo horjeeda diiwaanka dembiilaha galmada. Fadlan la soco in dembiilayaasha galmada ee diiwaangashan aan loo oggolaan inay galaan aagga dugsiya (Fiiri Nidaamka: [Dembiilayaasha Galmada ee Diiwaangashan 3.10.015-AD](#)). Dhammaan booqdayaasha/ mutadhawiciinta waxay u baahan doonaan inay xidhaan calaamad daabacan oo tilmaamaysa magacooda, sawirkooda, taariikhda iyo halka ay u socdaan.

Marka ugu horeysa mutadhawiciinta waa inay soo booqdaan www.pps.net/volunteer si loo buuxiyo arjiga tabarucaada ee onlynka ah lagana gudbo Hubinta Taariikhda Tabaruca. Mutadawiciinta la ogolaaday ayaa lagu dari doonaa nidaamka waxayna u baahan doonaan inay keenaan aqoonsi markii ugu horeysay booqashadooda. Tabarucayaal la oggolaaday ayaa laga yaabaa inay kormeeraan oo ay la shaqeeyaan ardayda dhigata dugsiyadeena, halka booqdayaasha loo oggol yahay marin u xadidan iyo muddo gaaban.

Waad ku mahadsantahay, fahamkaaga iyo taageeradaada borotokoolka badbaadada dugsiya ee degmaadeena.

